## Maxaad suubin kartaa hadii aadan ku qancin sida loo isticmaalay macluumaadkaaga ama loo wadaagay

Hadii aadan ku qancin jawaabta codisiyada macluumaadka ee aad naga soo codsato ama sida loo isticmaalay ama loo wadaagay macluumaadkaaga waxa aad kala hadli kartaa maareeyaha meesha aad daryeelka ka hesho.

Hadii aadan weli kusii qancin, waxa aad cabasho u-gudbin kartaa sidan:

Tel-ka: bilaash ah **0800 7834839**

Post: **Consumer Relations**
FREEPOST RLSH-BBHX-ZRRU
Trust HQ
EastONE
22 Commercial St
London E1 6LP

Hadiise aanu xalin kari wayno cabashadaada, waxa aad xaq u leedahay xafiiska 'the Information Commissioner's Office:

Web: http://www.ico.gov.uk/

Post: **Information Commissioner's Office**
Wycliffe House
Water Lane, Wilmslow, Cheshire. SK9 5AF

January 2013



# MACLUUMAADKA

# iyo ADIGA

## Macluumaadka Loo-adeegayaasha



**Warsidahan waxa aad ka helaysaa sida loo isticmaalo, loo wadaago ama aad u heli karto macluumaadkaaga iyo talaabada aad qaadi karto hadii aadan ku qancin sida loo isticmaalay.**

East London NHS Foundation Trust

## Daryeelkaaga

Si aanu kuugu fidino daryeelka ugu wacan, waxa aanu u baahan nahay in aanu diiwaangalino macliuumaadkaaga iyo daryeelka aanu kuu fidino.

## Macluumaakee ayuunu diiwaangalinaa?

**Macluumaadka aanu diiwaangalino waxxa ka mid ah:**

- Lambarkaaga NHS-ka
- Sida loola xiriiri karo adiga iyo xubnaha kale ee qoyskaaga
- Isir ahaan halka aad kasoo jeedo iyo sinjigaaga
- Hadii aad shaqayso macluumaadka ku saabsan shaqadaada iyo halka aad ku nooshahay
- Faahfaahinta cabiraadaha iyo dibu-eegida lagu sameeyo kiiskaaga
- Qorshaha daryeelkaaga, tusaale ahaan daaweynta laguu sameeyay iyo ama kuu qorshaysan mustaqbalka
- Is-waydaarsiga dhexmara anaga iyo dadka kale sida GP-gaaga, social worker-kaaga (hadii aad leedahay), iyo hay'adaha kale ee ku lug leh daryeelkaaga

Fadlan nasii macluumaadkaaga saxda ah, ee ugu dambeeyay (tusaale ahaan hadii aad badashay cinwaankaaga) si aad noogu saamaxdo in aanu kuu fidino daryeelka iyo daaweynta ugu haboon.

Waxana aanu xogta macluumaadkaaga ku kaydinaa hanaankana loo yaqaabo 'electronic health records system'. Helitaanka macluumaadkaasi waxa loo xafidaa si aad u xafidan, waxana la heli karaa uun kadib ogaanshahaaga, hadii ay lama huraan yahay. Ma heli karaan dadka ka baxsan hay'adan/Trust-ka, ama hay'ado kale oo aan loo ogaalaan.

Hadii aadan oglaan in aanu macluumaadkaaga ku hayn karo hanaankan alektarooniga ee 'local electronic system' suurtogal ma ahan in aanu kuu fidin karo daryeelka, blasé waxa aad hay'adaha kale ka dalban kartaa daryeelka. Hadaba tani waxa ay khusaysaa dadka u shaqeeya trust-ka iyo weliba dadka ay u adeegto. Sababtuna waxa ay tahay hadii aanan macluumaad kaa haynin waxa ka imaan karta halis.

## Sida laguula soo xiriiri karo

Hadii aad na siiso lambarka telefoonkaaga mobile-ka, waxa aanu fariimaha text-ka kuugu soo diri karaa xasuusinta balamaha, iyo macluumaadyada kale ee aan xaasaasiga ahayn, waase hadii aadan diidmo ka keenin.

Hadii aad rabto in macluumaadkaaga caafimaadka aanu kuugu dirno qaabka email-ka, waa in aad marka hore soo saxeexdo foomka 'Permission to Use and Share Information'. Waxa kale oo waajiba in email-ka aad rabto in macluumaadka laguugu soo diro aad nooga soo dirto email. Hadiise aad foom nooga soo diri waydo emailkaa, suurogal ma noqon karto in aanu emailkaa macluumaad kuugu soo diro.

## Helitaanka macluumaadka diiwaankaaga

Waxa aad xaq u leedahay in aad aragto, ama nuqul lagaa siiyo macluumaadkaaga caafimaadka ee ku jira diiwaanka, hadii loo hayo, qaab elektaaroonig ah ama waraaqo ku qoran.

Hadiise qof wakiil kaa ah, qaraabo ahaan ama qareen ahaan, ay doonayaan macluumaadkaaga, waxa loo baahan yahay in aad marka hore oglaanshahaaga qoraal ahaan noogu soo gudbiso. Waana in qoraalka ogolaanshahaaga lagu soo lifaaqo qoraalka

ay macluumaadkaaga kusoo codsanayaan. Hadii kale waxa daahi doona codsiga waayo waxa aanu waydiin doonaa ogolaanshahaaga. Waxa suurtogal ah in lagugu soo dalaco kharashka ku bixi kara bixinta macluumaadkaaga.

Helitaanka macluumaadkaagu waxa ay qaadan karta ilaa 40 maalmood, balse waxa aanu ku dadaali doonaa in aanu kuugu soo jawaabno 21 maalmood.

Hadii aad rabto in aad aragto ama lagu siiyo nuqulka macluumaadkooda, waxa aad la xiriirtaa maareeyaha meesha aad daryeelka ka hesho. Hadiise aadan aqoonin xiriirka maareeyaha, waxa aad la xiriirtaa kooxda macluumaadka ee ‘the Information Governance team’:

Email: foirequest@eastlondon.nhs.uk

Post: **Information Governance Manager** Trust HQ, EastONE
22 Commercial St, London E1 6LP

Macluumaad dheraad ah waxa aad ke heli kartaa
Website-kan http://www.eastlondon.nhs.uk

Fadlan ogsoonow in marmarka qaarkood ay suurtogal tahay in sharcigu naga madnuuco in aanu ku siino dhamaan macluumaadka aad rabto in aad aragto.

# Wadaagida macluumaadka aan shaqsi ahaan lagaa tilmaansan karin

Marmarka qaarkood waxa aanu hay'adaha kale la wadaagnaa macluumaad aan lagaa tilmaansan karin shaqsi ahaan – tusaale ahaan adeega qandaraasyada, kuwaasi oo bixiya maalka daryeelkaaga. Markani marka aanu macluumaad gudbinayno waxa aanu macluumaadka ka saarnaa waxii shaqsi ahaan lagaa tilmaansan karo. Waxana tani loo yaqaanaa macluumaad magac/tilaam laawe ah.

## Helitaanka ogolaanshahaaga

Hawl-wadeenaka kiiskaaga ayaa kaa codsan doona in aad ogolaato in macluumaadkaaga shaqsiga ah la wadaagi karo. Balse waxa kuu banaan in aad ogolaanshaha diido ama xadido xadka macluumaadka la wadaagi karo. Balse hadii aad diido in aanu wadaagno macluumaadka waxa suuryogal ah in xaaladaha qaarkood aanay suurtogal ahayn in aanu daryeel kuu fidino.

Waxana lagaa codsan doonaa in aad saxeexdo foomka Ogolaanshaha Wadaaga Macluumaadkaaga (Permission to Use and Share form) oo aad ku xaqiijinayso ogolaanshahaaga. Ogolaansho buuxa macnaheedu waxa weeyi in macluumaadkaaga shaqsiyadeed lala wadaaagi karo qofka ku daryeela, ahelkaaga, iyo adeegyada/hay'adaha kale ee khuseeya daryeelkaaga.

Iska hubso in aad fahanto waxa aad ogolaanayso inta aadan saxeexin foomkan 'Permission to Use and Share'.

Balse xaaladaha qaarkood, tusaale ahaan kuwa gargaarka degdega ah ama kuwa sharcigu waajibka ka dhigayo waxa suurtogal ah in xayiraadaada ogolaansha la jebiyo.



**Hadii aad wax su'aalo ah ama walaac ah ka qabto sida aanu u-isticmaalnay macluumaadkaaga ama loo wadaagay, fadlan kala hadal hawl-wadeenka qaabilsan daryeelkaaga.**

Macluumaadka qaarkod, tusaale ahaan macluumaadyadii faylashii hore waxa loo xafidaa waraaq ahaan.

Fadlan xasuuso in aanan macluumaadkaaga caafimaadka ku min-guurin hanaanka diiwaanka ee loo yaqaano 'national Summary Care Record.'

## Dahsoonaanta (Confidentiality)

Waan ogsoon nahay in macluumaadka aad noo sheegtaa ay noqon karaan kuwo xaasaasi ah, isla markaana waxa aanu tixgalin siinaa in uu dahsoonaado.

Sharci ahaan waxa nagu waajib ah in aanu xafidno dahsoonaanta macluumaadka aanu idinka hayano.

Marka aanu macluumaka u-isticmaalno sidii loogu kobcin lahaa haboonaanta iyo hufnaanta adeegyada, ma ogolaano in aanu gudbino macluumaad laga tilmaansan karo shaqsiga macluumaadka leh.

## Sidee u isticmaalaa macluumaadkaaga?

**Macluumaadkaaga waxa aanu u isticmaalaa sidii aanu:**

- Hada iyo mustaqbalkaba kuugu fidin lahayn daryeel haboon oo wax-ku-ool ah
- Kuugu sharaxi lahayn go'aanadanaga

LS193838/13-Somali

- U-baari karo karo wixii cabasho ah ee aad noo soo gudbiso
- U-kormeeri lahayn, una hanti-dhowri karo daryeelkanaga aanu kuu fidino.

**Macluumaad aan shaqsiga laga tilmaansan karin, waxa aanu u-isticmaalaa sidii aanu:**

- U-qorshayn lahayn adeegyada mustaqbalka
- Ula-socon lahayn in adeegyadu yihiin kuwo tayo-fiican, oo wax-ku-ool ah
- U-kaalmayn lahayn/xafidi lahayn caafimaadka dadka deegaanka
- Qof walba ula macaamili lahayn si cadaalad ah

## Wadaaga macluumaadka shaqsiyadeed

**Macluumaadka shaqsiyadeed ee Trust-ka hayso waxa loo wadaagaa sidii:**

- Hawl-wadeenada kooxaha kala duwan ee kuu adeegaa u arki lahaayeen, kuna biirin lahaayeen macluumaadka muhiimka ee khuseeya daryeelkaaga. Kooxaha kale duwan ee ka hawlgala waxa ku jira tusaale ahaan adeege bulsho (social worker) iyo hawl-wadeenada kale ee daryeelkaaga kaalin ka qaata. Waxana jira heshiisyo ku waajibinaya in hawl-wadeenadaasu adeecaan nidaamka iyo siyaasada xafidaada macluumaadka ee Trust-ka.

**Waxa kale oo aanu macluumaadkaaga shaqsiga ah la wadagnaa hay'adaha kale:**

- Si aanu kuugu fidino daryeelka iyo adeegyadaada.

**Hay'adaha aanu la wadaagno macluumaadkaaga shaqsiga ah waxa ka mid ah:**

- GP-gaaga
- Hay'adaha kale ee caafimaadka – tusaale ahaan, cusbitaalka
- Waaxda Guryaha ama Ururada Guryaha
- Waaxda Gunooyinka (The Benefits Agency).

**La-wadaagida macluumaadka ee daryeelahaaga ama qoyskaaga**

**Waxa aanu macluumaadka shaqasiyanka ah la wadaagi karaa qofka ku daryeela ama qoyskaaga, waase hadii aad:**

- Ogolaato
- Aadan lahayn karaanka in aad go'aamadaada iskaa u gaarto
- Aad tahay qof yar oo aan awood u lahayn in aad go'aamiso daryeelkaaga
- Aad ku-jirto daryeel qoys, isla markaana aad ogolaatay in aad la wadaagi karto maclumaadka xiisadaha tarabiga qoyska

Wadaaga macluumaadka waxa la ogolaan karaa oo kaliya wixii khuseeya baahi lamahuraan ah. Waxana ay hawl-wadeenada kiiskaaga caafimaadku kuu sifayn doonaan macluumaadka shaqsiyanka ah ee la wadaagi doono, iyo sida loo suubin doono.

Waxana aanu wadaagnaa macluumaaka ugu yar ee ujeeda ku haboon, si markaasi laguugu fidin karo daaweynta, daryeelka iyo bad-qabka adiga iyo dadka kale ee ay khusayso. Waxana lala wadaaji doonaa dadka ay khusayso oo kaliya. Qofkasta oo macluumaadkaaga hela waxa ku waajib ah si la siman, oo ay ku xafidaan macluumaadka.

Waxa suurtogal ah in ay hay'adaha kale nala wadaagaan

macluumaadkaaga si ay nooga kaalmeeyaan in aanu kuu fidino daryeelka.

Waxana aanu ku dhiiri galinaa qofka ku daryeela iyo qoyskaagu in ay sidan suubiyaan si aanu si wacan ugu fahano daryeelka aad u baahan tahay.

**Sharciga ayaa xakamaynaya xaaladaha hadii macluumaadkaaga la wadaago adiga oo aan ogolaan.**